

CentraCare Health

Soo Koobidda Kaalmada Maaliyadda

Raadso in lagaa kaalmeeyo biilasha caafimaadka

CentraCare Health waxay xil iska saartay in ay bulshada siiso daryeel caafimaad tayo-sare iyadoo aan la fiirinin awoodda qofka u leeyahay in uu bixiyo kharashka. Sida qeyb ka tirsan xilka aan iska saarnay in aan u adeegno baahida caafimaadka dadka aan haysanin ceymis ama haysta ceymis liita, CentraCare waxay kharashka ka dhintaa dadka dakhligooda ka yar yahay 250% Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka.

Si aad u heshid koobi lacag la'aan ah oo ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy) ama Arjiga Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Application) iyo shabakada xaq u yeelashada, waxaad wici kartaa nambarada soo socda:

- Adeegyada Maaliyadda Bukaanka Caafimaadka CentraCare (CentraCare Health Patient Financial Services), telefoonka 320-255-5613 ama telefoonka lacag la'aanta 1-844-460-5533

Waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid daryeelka la dhimay, kaalmada maaliyadda ama in aad ka fa'iideysatid qorshaha lacag bixinta. Xaaladda qoys kasta waxaa lagu saleyaa dakhliga, tirada qoyska, hantida iyo qodob kale.

Si aad u heshid koobi lacag la'aan ah oo ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda ama arjiga, booqo www.centracare.com/pricing-financial-assistance. Waxaad kaloo qof ahaan koobi ka codsan kartaa Xafiiska Biilasha Isbitaalka St. Cloud (Billing Office of St. Cloud Hospital), ee ku yaal Albaabka Waqooyiga, waddada 1406 Sixth Ave. N., St. St. Cloud, MN 56303

Codso in koobi laguugu soo diro boostada: CentraCare Health

Adeegyada Maaliyadda Bukaanka (Patient Financial Services)
1406 6th Avenue North
St. Cloud, MN 56303

English: CentraCare Health complies with applicable Federal civil rights laws and does not discriminate based on race, color, national origin, age, disability, or sex. ATTENTION: If you speak another language, language assistance services, free of charge, are available to you. Call 1-320-255-5989 (TTY: 1-320-255-5983).

Somali: CentraCare Health waa mid u hogaansan xeerarka dawladda dhexe ee ilaalinta xuquuqda aadanaha mana ogola heyb sooc ku saleysan qowmiyadda, midabka, halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan, da'da, naafanimada ama jinsiga qofka. XUSUUSO: Haddii aad ku hadasho af Soomaali, adeegyo kaalmo oo dhanka luqadda, oo bilaash ah, ayaad helayaa. Soo wac 320-255-5989 (TTY: 1-320-255-5983).

Spanish: CentraCare Health cumple con las leyes federales de derechos civiles aplicables y no discrimina por motivos de raza, color, nacionalidad, edad, discapacidad o sexo. ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 1-320-255-5989 (TTY: 1-320-255-5983).